

WAR-SAXAAFADDEED

Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed waxay manta oo tariikhadu tahay 17/01/2024, hawada Jamhuuriyada Soomaaliya ka celiysay diyaarad ay leedahay shirkada Ethiopian Airlines, noceedu yahay Dash 8-Q400, flight number ET8372 kuna socotay Hargeysa, kadib markii ay cadaatay inaanay diyaaradaasi haysan wax fasax ah oo ay ku isticmaasho hawada Soomaaliya.

Si waafaqsan shuruucda caalamiga ee hawada (Rules of the air) iyo kuwa Soomaaliya ee SOMCARs, duulimaadyadu waa inay fasax (ruqsad) kahaystaan wadamada ay hawadooda marayaan iyo kuwa ay ku dagayaan kahor inta aanay soo duulin (prior to departure).

Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed waxay cadaynaysaa in aanay ogolaandonin in diyaarad aan ruqsan haysani soo gasho dhamaan xuduudaha hawo ee wadanka, iyadoo ilaalinaysa nidaamka iyo wada shaqaynta dhaw ee kala dhexeysa dhigeeda aduunka.

Hay'addu waxa ay cadaynaysaa in sidii caadiga ahayd ay u socdaan Duulimaadyadii joogtada ahaa.

Waa Bilahi Towfiiq.